**Sharci L. 32 ee 10kii Maarso 1973**
**Asaasid Wakaalad Qaran ee Warshadda Kalluunka**

**GUDDOOMIYAHA**
**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

Markuu tixgeliyey ansaxidda Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayeyaasha Dowladda;
Wuxuu soo saaray, sharciga soo socda;

## Qod. 1
## Aasaasid

1. Waxaa la asaasay Warshadda Kalluunka ee Las Qoray (Fish Connery) ee ah hay'ad, laguna magacaabo Wakaaladda Qaranka Warshaqdda Kalluunka (WQWK)
2. Wakaaladda waxay hoos imaaneysaa qodobbada sharcigaan, sharciga iyo xeer-hoosaadka ee hay'adaha leh Xuquuq Guud.
3. Wakaaladda waxay xarun sharci ku leedahay las Qoray, waxayna yeelan kartaa xafiisyo wakiilnimo iyo hay'ado meel kasta oo ka mid ah dhulka Jamhuuriyadda ama dibadda.

## Qod. 2
## Kormeeridda

1. Hay'adda waxay hoos tagtaa kormeerka xoghayaha Dowladda ee Warshadaha.
2. Xog-hayaha Dowladda ee warshadahu, markay la noqoto lagama maarmaan iyo maslaxadda Qaranka, wuxuu awoodaa had iyo jeer inuu bixiyaa tilmaamaha muhiimka u ah hay'adda si waafaqsan xeerkan iyo qodobbada guud ee hay'adaha leh xuquuq guud ama qodobbo kale.

## Qod. 3
## Ujeedooyinka

Hay'adda waxay dabagaleysaa ujeedooyinka soo socda;

1. Wax kaqabadka horumarinta warshadda iyo wax soo saarka la xiriira;
2. ka shaqeynta hawlaha iyo ka ganacsiga kalluunka iyo wax soo saarka la xiriira.
3. ka shaqeynta hawlaha iyo ka ganacsiga wax kasta oo hoosteeda yimaado.

## Qod. 4
## Awooddaha

Waxaa la siiyey warshadda inta ku siman sharcigan, dhammaan awoodaha iyo waxqabadka lagama maarmaanka u ah socodsiinta waxqabadkeeda iyo ka gungaaridda ujeedooyinkeeda hay'ad ahaan.

**URUR**

**Qod. 5**

Agaasime Guud iyo Agaasime Waaxeed

1. Hay'adda waxaa socodsiiya Agaasimaha Guud, ee lagu magacaabay Dekereetada Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka, kaddib soo jeedinta Xog- hayaha Dowladda ee Warshadaha.
2. Hay'adda waxay u qaybsan tahay waaxyo, adeegyo iyo qeybo socodsiiyaan maamulayaasha qeybaha, madaxda shaqada iyo madaxda waaxyaha.
3. Agaasimayaasha Waaxda, waxaana lagu magacabaa Dekereetada Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka, kaddib soo jeedinta Xog-hayaha Dowladda ee Warshadaha.

**Qod. 6**

**Shaqooyinka Agaasimaha Guud.**

1. Agaasimaha Guud waa wakiilka sharciga ah iyo xubinta ka taliya hay'adda, wuxuuna qabtaa howlaha soo socda;
   a) Wuxuu gala heshiisyo danta warshadda.
   b) Waa mas'uulka maamulka iyo socodsiinta Hay'adda, wuxuuna qaadi karaa tallaabooyin maamul iyo mid asluubeyd ee khuseysa shaqaalaha Warshadda inta ku siman awooddiisa, si waafaqsan sharciga 22 Abriil 1972 L.36 iyo tan DPR 22-4-1972 L.74;
   c) Wuxuu mas'uul ka yahay haynta hab xisaabeedka .
   d) Socodsiiya shaqooyinka kala duwan, bixiyaana waxqabadkooda wax ku oolka ah.
2. Haddii ay dhacdo hakad ku meel gaar ah ama maqnaansho Agaasimaha Guud, howlaha waxaa socodsiinaaya sarkaal uu magacaabo xoghayaha Dowladda ee Warshadaha.

**Qod. 7**

**Habraaca Sharci iyo dhaqaale ee shaqaalaha Hay'adda.**

Gunnooyinka abaalmarineed ee Agaasimaha Guud iyo xaaladda sharci iyo dhaqaale ee shaqaalaha warshadda waxaa hagaya sharciga 22-4-72, Lam. 36 iyo kan DPR, 22 Abriil 1972 L.74, iyo isbedel kasta ee ku yimaada iyaga.

**Qod. 8**

**Shaqaalaha Hay'adda**

1. Shaqaalaha Hay'addu wuxuu ka kooban yahay shaqaalaha joogtada ah iyo ku meel gaarka ah oo toos ah u qaadataay isla hay'adda iyo shaqaale dowladeed ee ka baxsan iyada.
2. Xubinta shaqaalaha hay'adda waxaa lagu xeeraynayaa Dekereto Guddoomiyaa Golaha Sare ee Kacaanka, kaddib soo jeedinta Xog-hayaha Dowladda awoodda u leh.
3. Shaqaalaha Hay'addu u baahan tahay waxaa lagu qaadanayaa si wafaqsan Dekereetada Guddoomiayha Golaha Sare ee Kacaanka 22 kii Abriil 1972 L.74 oo la xiriirta xeerhoosaadka shaqaalaha hay'adda leh xuquuq Guud iyo isbedel kasta ee ku yimaada mustaqbalka.

**Qod. 9**
**Waajibaadka iyo mas'uuliyadda**

1. Xaaladda sharciyeed, waajibaadka iyo mas'uuliyadda shaqaalaha Dowladda ee u gaarka ah warshadda waxaa lagu maamula sharciga 1da Abriil 1970, L.29 iyo isbedelkii ka dambeeyey ee la xiriira Nidaamka Shaqaalaha rayidka ah ee Dowladda
2. Xaaladda sharci iyo mas'uuliyadda shaqaalaha Hay'adda waxaaa lagu dhaqaa sharci 22 Abriil 1972 L. 36 iyo Xeer nidaamiyaha shaqaalaha ee hay'addaha leh xuquuq Guud, oo lagu ansaxiyey Dekereetada Gudoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka 22 Abriil 1974 iyo isbedel kasta ee ku yimaada mustaqbalka.

**Qod. 10**
**Xil ka qaadis**

Agaasimaha Guud iyo Agaasimayaasha Qeybaha waxaa looga qaadi karaa xilka isla habkii hore ee magacaabiddooda.

**Qod. 11**
**Hanti**

Hantida Hay'adda waxay ka koobantahay

a) Guurto iyo Maguurto iyo xuquuq kasta ee Warshadda Kalluunka ee Las Qorey, ee jirtay intuusan dhaqan gelin sharcigaan;
b) Wixii kaloo ka soo galo dowladda, hay'ado Guud, Ururo Caalami ama kuwo gaar ah;
c) Wax ka soo jeeda dakhli waxqabadkeeda.
d) Ka soo jeedda lacag kayd ah ee ka kooban; dhigaalka saamiyada ee adeegyada waxtarka leh, inta ku siman sharciga hay'adaha leh xuquuq Guud iyo kuwa ku yimado isbedel waqtiga soo socda;
e) Iyo dakhliyo kale ee marmar la helo.

**Qod. 12**
**Miisaaniyad Sannadeedka**

1. Waxqabadka dhaqaale wuxuu bilaabanayaa kowda Jannaayo, kuna egyahay 31da Diseember ee sannad walba.
2. 30ka Sebtember gudahiisa ee sannad walba, Agaasimaha Guud ee Hay'adda wuxuu diyaarinayaa qorshaha miisaaniyadda waxqabad dhaqaale ee ku xiga, isagoo tilmaamaya aragtiyada kharajka soo galay iyo kuwa baxay, wuxuuna hordhigaa, si loo ansixiyo, Xog-hayaha Dowladda ee qaabilsan Warshadda.
3. 31ka Maarso gudaheeda ee sannad walba Agaasimaha Guud wuxuu diyaarinayaa miisaaniyadda ku baxayso iyo xisaabta faa'iidada iyo khasaaraha, wuxuuna u gudbinayaa Wasaaradda Warshadaha iyo Wasaaradda Maaliyadda.

4. Xog-hayaha Dowladda ee Warshadaha, markuu dhageysto Xog-hayaha Dowladda ee Maaliyadda, wuxuu ansaxinayaa Qorshaha Miisaaniyadda baxeyso. wuxuuna amri karaa in lagu baahiyo Faafinta Rasmiga ah, kharajkana bixinayso warshadda.

**Qod. 13**
**Hab Xisaabeedka**

Hab xisaabeedka Hay'adda waxaa la maamulaa, laguna dhaqaa si waafaqsan habraaca u degsan qodobbada Guud ee maamula hab xisaabeedka ku tilmaaman sharciga 31 Juulay 1972, L.58 iyo wixii kale isbedel ah ee soo raaca iyo qodobbada Guud u degsan hay'adaha Danta Guud.

**Qod. 14**
**Barnaamijka Sannadlaha**

30ka September gudaheeda ee sannad walba Hay'addu waxay diyaarineysaa warbixin baraamijka Guud ee la xiriira Sannadka soo socda, iyadoo tilmaamayso Qorshaha kharajka iyo hannaanka dhaqaale ee looga hortagi karo, waxayna horgeynaysaa, si loo ansixiyo, Xog-hayaha Dowladda ee Warshadda.

**Qod. 15**
**Ammaah**

Hay'adda waxay awooddaa, iyadoo fasax ka haysata Xog-hayaha Dowladda ee Warshadaha, in la gasho heshiis ammaah hay'ado ammaah iyo bangi gudaha ama dibedda.

**Qod. 16**
**Dib u eegid xisaabaadka**

Hab Xisaabeedka hay'adda waxaa kormeera, oo dib u eega la baara naqtiimiyaane Waaxda Xafiiska Hantidhowrka Guud.
Wasiirka warshaduhu wuxuu amri karaa waqti kasta baaris iyo kormeer hab xisaabeed iyo maamuleedba, marka laga reebo qoraalka ku xusan faqrada la soo sheegay.

## XEERARKA GUUD

**Qod. 17**
**Xeer-hoosaad**

Xeer-hoosaadyada ee waxqabad ee sharcigan waxaa lagu soo saari karaa Dekereetada Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka, kaddib soo jeedinta Xog-hayaha Dowladda ee Warshadaha.

**Qod. 18**

**Guddiga Maamulka**

Agaasimaha Guud ee hay'adda waxaa gacansiiya guddi maamuleed, si waafaqsan xeerka iyo sida uu qabo habraaca ku xusan sharciga 22kii Abriil 1972 dii L.36 ee DPR 22 Abriil 1972. L. 74.

**Qod. 19**

**Baabi'in**

Waxaa la baabi'iyey qodob kasta ee ka horjeeda ama aan la socon karin sharcigaan.

**Qod. 20**

**Dhaqan gal**

Sharcigaan wuxuu dhaqan galaa laga bilaabo 10 Jannaayo 1972.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Demoqradiga Soomaaliya.

Muqdisho, 10 kii Maarso 1973

GUDDOOMIYAHA
Golaha Sare ee Kacaanka
Sareeye Gaas Maxamed Siyaad Barre